

#### Cabirada Homarka Aqoonta (MAP)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



#### MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

Imtaxaanada MAP waa imtaxaano oonleen ah oo lagu ogaanaayo hormarka maadooyinka xisaabaadka, akhriska, iyo adeegsiga luuqada. Dhamaan ardaya dhigta fasalada 6-12 kuwaasoo kadiiwaangashan dugsiyada pathway ga ayaa la imtaxaanayaa sida gobalku doonaayo. Imtaxaanadu waxay leeyihiin faaiidooyin dhanka casharada ah oo muhiim ah marka ardayda laga qaado xiliyo cayiman maadaama ay suurogalinayso in la ogaado in arday gaar ah, ama hamaan ardayda fasalkaas maraysa, ay samaynayaan hormarkii laga rabay maadooyinka inay kasameeyaan.



#### XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Waxaa jiro 3 jeer oo imtaxaan laqaado sanad kasta (Dayrta, Jiilaalka, iyo Gu'ga). Inta lagu jiro xili imtaxaaneed kasta, ardaygaaga waxaa imtaxaanka laga qaadaya halmar maado kasta oo kamid ah imtaxaanka MAP. Imtaxan kasta wuxuu soconayaa kudhawaad 50 daqiiqo. Mudooyinka imtaxaanka ayaa ladheereeyaa si loogu sahlo dugsiyada dookhyaa ufuran si ay udajiyaan jadwalada imtaxaanka. Si aad uhesho maalmaha gaarka ah ee imtaxaanka laga qaadi doona cunugaaga, laxariir dugsiyagaaga si toos ah.

#### Dhinacyada la Imtixaamayo

Xiliyada imtaxaanku waa waqti cayiman xiligaasoo ardaygaagu imtaxaan gali karo maalmaha qaar halka maalmaha qaarna casharo caadi ah lasiinaayo. Ardayda imtaxaanka magalaan dhamaan mudada loo asteeyay imtaxaanku inuu socdo. Si aad uhesho macluumaadka maalmaha gaarka ah ee ardaygaagu imtaxaanka galaayo, fadlan waydii macalinka cunugaaga.

Dayrta	Agoosto – Nufeembar
Jiilaalka	Diseembar – Feebaraayo
Gu'ga	Maarso – Juun



#### WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Natiijooyinka imtaxaanku waxay cabiro muhiim ah kabaxshaan inta ay le'egtahay dadaalka ardaygaagu kubaranaayo fikradaha iyo xirfadaha udagsan heer kasta si markaas ardaygaagu guul uga gaaro fasalkiisa ama keeda ay hadda dhigato uuna usii wado hormarka dhanka aqoonta laga bilaabo sanad ilaa sanadka kale.

Imtaxaanka MAP, cunugaagu wuxuu helayaa natiijada RIT maado kasta oo lagu imtaxaano taasoo muujinaysa waxa uu yaqaano, inuu diyaar u yahay waxbarashada iyo inuu higsanaayo siduu guul ugaari lahaa. Natiijadaan waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa in lagu go'aansho go'aaminta kobaca ardayga sanadka oo dhan iyo in isbarbardhig lagu sameeyo kobaca ardaygaaga marka loofirsho ardayda ay isku heerka waxbarashada marayaan iyo heerarka udagsan gobalka. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan natiijada RIT ee cunugaaga, fadlan laxariir macalinka cunugaaga.



## SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Natijoooyinka imtaxaanka MAP ayuu u adeegsadaa macalinka cunugagu soo diyaarinta cashar gaar u ah baahiyaha ardayga. Natijoooyinka waxaa sidoo kale loo adeegsadaa hufnaanta Naqshadaha Dadaalka Dugsiga ee heer egmo iyo heer gobal labadaba.



## WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirgalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

### Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada

Booqo:

- <http://assessments.dpsk12.org>

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.